

Våga Värna (Rabshadaha hantiyeed)!

- arin binaadanimo

Golaha deegaanka Älvkarlebyhus,
Älvkarleby, Booliiska iyo Sauvera ayaa
gacmaha isku qabsaday si u iftiimiyaan
rabshadaha xidhiidhada dhow iyo waxa
inaga binaadam ahaan iyo jaarku
sameyn karno si aan uga hor tagno.



Qof deegaan ku ah xaafadu, wuxuu maqli karaa oo arki karaa waxa ku kalifaya inuu jawaabcelin sameeyo.

Waxaanu rabnaa inaan kugu dhiirgalino inaad tallaabo qaadid haddii aad ka shakidid in qof ku jiro dhib. Maaha khasab inaad gabi ahaanba hubtid in qofkaasi ku jiro khatar, waxa kaliya ku filan inaad ka shakisan tahay arintan.

Haddii uu jiro shaki danbi ama khatar jirta ah, fadlan haka waaban inaad kala xidhiidhid **Booliiska 112**.

Ma hubtid miyaa in danbi la galay, waxaad wici kartaa **Khadka wicitaanka Sauvera ee xaaladah degdega 026-420 36 50**. Waxay toos ula xidhiidhaan masuuliyiinta booliiska haddii ay daruuri tahay.

Maaha khasab inaad u sheegtid magacaaga, laakiin waxa muhiima inaad aamisan tahay, **inaad badbaadinaysid nolol!**

Waxa ka jira dhowr qodob bulshada dhexdeeda oo u noqon kartid haddii adiga, qaraabo ama jaarku u baahan yahay caawimo ama taageero.

Lambarada tilfoonada muhiimka ah



Booliiska 112

Sauvera 026-420 36 50

Adeega daryeelka

bulshada 026-83 00 00

Adeega xaalada degdega

ee bulshada 018-15 50 00

Älvkarlebyhus 026-420 36 50

Kvinnofridslinjen 020-50 50 50

Hoyga dumarka ee Liljan 0293-100 22

Bris (Xuquuqda Caruurta

ee Bulshada) 116 111

Choose to stop

(Dooro inaad Joojisid) 020-555 666

tilfoonka caawimada

somaya 020-81 82 83

Sanadkii 2021, 19 kiis oo xadgudub ah ayaa lagu galay Iswiidhan iyadoo dhibanaha iyo danbiiluhu lahaayeen xidhiidh lamaane.

17% ka mida dhammaan kiisaskaasi xadgudubka ah ee 2021 waxay ahaayeen xidhiidh lamaane.

Inta ugu badan rabshadaha xidhiidhka dhow looma soo sheego masuuliyiinta booliiska. Kaliya rubuc ayaa loosoo sheegaa.

Xigasho: Golaha Qaranka Iswiidhan ee Kahortaga Danbiyada, bra.se

Våga Värna (Lagu Dhiirgalinaayo Daryeel!)

Waxa loogu talogakay in lagu faafiyo aqoonta iyo wacyigalinta rabshadaha xidhiidhaha dhow. Waxaanu sameynaa tani anagoo dejinayna qorshe muuqda oo mareynaya hawlo kala duwan



Hadafku waa in Våga Värna (Lagu Dhiirgalino inay Daryeelaan)! Mudada dheer waa inay noqotaa shay muwaadin kasta oo golaha deegaanka ah ka warqabo, iyo sidoo kale aragtida, dareenka, nooca tallaabo ee dadka deegaanka la xoojiyaa markay tahay shaki in qof waajahayo rabshad.

Hadafku waa in ay ka qeyb ahaadaan xaqyayaasha guryaha, ururada guryeynta, xaqyayaasha guryaha iyo dhinacyada kale ee golaha deegaanka si ay u taageeraan qorshaha.

Våga Värna (Lagu Dhiirgalinaayo Daryeel) waa qorshe ay keeneen Östahmmars-hem kaasoo loo doortay inuu ka qeyb ahaado. Madaamoo aynu nahay golayaal deegaan oo badana islamarkaana ka wada shaqeynaya hal arin, waxaanu rajeynaynaa inaan aad u faafino. Wadajir waxaynu u sameyn karnaa isbade!!

Halkan alvkarlebyhus.se iyo alvkarleby.se waxaad ka akhrin kartaa waxbadan oo khuseeya qorshaha iyo halka aad ka heli kartid macluumaad badan iyo caawimo haddii aad u baahan tahay.

Macluumaad badan oo ku qoran luuqado badan, sawir furaha QR

Rabshadaha jidheed

Tantoobooyinka, feedhadhka, laagaga, ceejinta, iskudayga cabudhinta, barkimooyinka leh qalab ama hub.

Rabshadaha galmo

Taabasho aan la rabin, in lagu khasbo sameynta ama ficilada galmo, kufsi, wajihiida noocyo kala duwan oo ficilo galmo.

Rabshadaha cilmi-nafsiyadeed

Go'doominta, xadgudubka hadalka ah, baqdin maal nafsiyeed, bahdilid.

Rabshadaha hantiyeed

Waxyeelaynta hantiyeed, danbiile jajabiya alaabta guriga iyo ashyaada kale ee guriga. Qof jilicsan ayaa sidoo kale lagu khasbi karaa inuu jajabiyo wax uu leeyahay oo muhiim u ah. Rabshadaha waxa sidoo kale lala beegsan karaa xayawaanka dab joogta ah.

Rabshadaha shucuureed

Xakameynta maaliyada qoyska, baadhitaanka kaadhka bangiga ee qof kale, weydiinta warbixinta kharashka, ku khasbida soo amaashasho lacageed si la iskaga ilaaliyo rabshad, ku khasbida joojinta shaqo si loo dafiro qofka lacagtiisa.

Rabshadaha Maskaxeed

Rabshadaha maskaxeed waa inay jirto cabsi ama walaac rabshadeed oo joogto ah. Waxay noqon kartaa cadho ama dadaansi kaasoo tilmaamaya dabciga iyo sharaxaada jidheed ee danbiilaha, oo abuuraya cabsi loona arko khatar ama xasuusiyey rabshado hore u dhacay.

Dayacaada

Bilaa cunto, nadaafad ama daawo, iyadoo loo diidayo ama loo jajabinayo si ula kac ah waxyaabaha muhiimka ah, si dhibanuhu ugu tiirsanaado danbiilaha.

Wadashaqeyn ka dhaxaysa



Älvkarleby
kommun

